## Jawaabtii Duubka Sare ee Switzerland

***Waxaa na soo Gaartay Jawaabtii aanu wada sugeyney ee ku saabsanayd Cabashadii 04.03.2008 Bundsplatz Bern aanu ugu gudbinay Duubka Sare ee Dowladda Swizerland kuna hagaajiney Marwo Kalmi-Rey.***

Dhibaatadii-Guud aanu ka cabanay aya aheyd:

- Dhibaatada Switzerland ina keentay ee Dhulkeena ka jirto in aysan ahayn mid sahlan.
- Iyo tan innagu heysata dalkaani oo ah, Sharcigaa kuumeelgaarka uun ahoo Ummaddii oo idil wada Curyaamiyey.
- Dhalinyaradii oo ku barbaartay Xirfad laáan (Mustaqbal daro)
- Aqoonyahanadii iyo Xirfadleydii oo ka lumay Khibradihii ay lahayeen
- Guryihii yaraa oo keenay, Colaad ka dhexabuurantay, Reerkii Jaceylka ku wada noolaan jirey
- Dhaqdhaqaaq Xurnimo Laáan, kalifey Horumar daro iyo Niyad jab
- Walwal joogto ah oo qofkii uusan hubin nolol Mustaqbal leh
- Culeys adag oo ka jira Dhinac Waliba, kalifayna Burbur iyo Halaag wada saleeyey Maatada Somaliyeed oo idil.

<u>Sidaa darteed Waxaanu Codsigeena ku soo Koobnay:</u>

- Qaxootiga Soomaaliyeed ee Cusub markii Somalinimadiisa la hubsado in loo Aqoonsadaa Qaxooti Beni'aadaminimo oo dhaxalgal ah.
- Qaxootiga Somaliyeed ee Muddooyinkanba lagu dhaqayey Xeerka F in si deg deg ah loo tixgeliyo Habka uu caalamka ka qabo Dad Dhulkoodii iyo Qarankoodii burburay.
- Kaalmo Waxbarasho oo Degdeg ah iyo Wadashaqayn ku saleysan Horumarin.
- In Si deg-deg ah loogu diro Mucaawino Dadka Masaakiinta ah ee ku dhibaataysan Somalia.
- Dhexdhexaadin iyo Xal u Raadin Caalami ah Dhiabatada Murugada leh ee Somaliya.
- U Doodid Caalami ah Ku-Xad-Gudubka Beni-Aadaminimo Xumida ah ee heysta Shacabka Somaliyeed.
- U Doodid Qarannimadii iyo Madaxbanaanida Somaliya.

**Jawaabtii ka soo Baxday Banaanbixii 03.04.2008 waa sida tan:**

Salaan iyo Ixtiraam ka dib,
Waan idiinku mahadineynaa Qoraalkii 03.04.2008 Kuna Socday Duubka Sare ee Switzerland Marwo Kalmi-Rey, jawaabteediina loo soo gudbiyey Qaybta Siyaasadda Arimaha Afrika.

Switzerland weli way ka murugeysantahay Dhibaatada Somaliya.
Shacabka Somaliyeedna wuxuu u baahanyahay Kaalmo Beni'aadaminimo iyo Nabadgelyo.
Dowalda Swiska waxay u ololeynay Adduunweynahan ka codsaday in Gobolkaasi la dejiyo.
2008 waxay Switzerland ugu deeqaydaa Somaliya Lacag ku dhow 4 Milyan oo Faran, loona marinaayo Lanqeyrta Cas (ICRC), Medecins sans fronietier iyo WFP.
Swiisku wuxu kalo ku dadaalaayaa Caawinaadyo Beni-aadaminimo ah sidii loo gaarsiin lahaa, wuxuu kaloo Qaybweyn si caalami ah kaga qadanayaa sidii Dhinac loo dhigi lahaa Dagaalada Somaliya.
Colaadaasi joogtada ah iyo Nabadla'aanta ka jirto Dalka Somaliyana maahan wax waqtigaan xaadirka ah la hormarin karo.

**Tashiyo kala duwan ka dib.**
Si dhibatada jirto loo soo afjaro, oo Dialog ahaan looga wada munaaqashoodo, Advokatayaalna lala tashto, marba haddii uu Duubka sarr ee Waddankaani Switzerland soo Cadeeyeen in Shacabka Somaliyeed ay dhibaateysan yihiin, ayaa Waxaa waajib nagu ah inaan helno dhamaan Matalayaasha Dowladdahoose ee Switzerland, si ay Arimaheena Sharci, Waxbarasho iyo Shaqo u Furdaamiyaan, maadaama ay Madaxdii Sare inoo Qirteen inaanu nahay Dhibanyaal.

**Kulankaani wuu ka duwan yahay kuwii hore oo idil!**
Waanu Soconay oo Banaanbaxnay oo qaylinay.
**Hayeeshee markani waa Dialog Wadahadal Toos ah!!!**
Ugu yaraan 2-3 Todobaad ayaan Wadaxaajood Maslaxa doon ah la yeelaneynaa:
Maamulada Goboldada, Maamulada Qaxootiga iyo Maamulada Qaybaha Bulshada iyo Barlamankaba ee Waddankani aanu joogno ee Swizerland, kuwaasoo ku qaabilayno Magalada Zürich.
ka bilow 18.08.2008 Waxaanu degeynaa kana Cunteynaynaa, goobtaasi aan ku qaabileyno Maamulada Gobolada si loo soo dabarjaro Dhibaatada Waddankan nagu heysato..
waxaanu filaynaa in ay ka soo baxaan Maalmahaasi Jawaab Mirodhal ah.
Waayeelada, Dhalinyarada Caruurta Somaliyeed oo Dumar iyo Ragba leh. Iyo Masuuliyiinta Jaaliyadaha Somaliyeed ee Kakalasocda Gobalada Fadlan u diyaar garooba Qaabilaadaas iyo Doodaasi.Danta Guud ah.

**Waxyaalaha Looga Doodi Doono ayaa ka mid ah:**
- **Sharci Beni-aadaminimo** oo aan loo kala saarin ka shaqeeyo iyo kaan shaqayn karinba. Sababtoo ah Dad tiro badan oo Waayeel iyo Dhibanayaal isugu jiro, Sanooyin badana ku noolaa Waddankani oo aan buuxin karin habka sharciga lagu siiyo kuwa shaqeeyo.
- Dhalinyarada kuwii horey u joogay iyo kuwa dhowaanahaan soo galayba, in ugu yaraan ay helaan **Waxbarasho** Xirfadeed iyo mid Cilmiyeedba.
- Dadkii Somaliya horay **Xirfad** u lahaa in looga jafo Boorka.
- **Integration**: Dhaqankeena Somaliyeed ee Qaaliga ah Tixgelintiisa iyo Fududeyn guud si aan Dhaqamada kala Duwan ee ku nool Waddankaani wax ula qaybsano.
- 

Dhalinyarada Xerooyinka ku jiro, Fadlan soo Qaata Gogoshaad ku jiifan lahaydeen.
Sida: Kubeerto, Rumi, Shukuman iwm.

Codsigeenu Waa:
- Waxaan u baahanahay waa Xaquuq Guud oo aanan Cidna lagu dulmeynin!
- Waxaan dooneyna inaan Dunida wax laqaybsano oo aan ka baxno Dulinimada!
- Waxaan nahay Qoom jira sida Qaruumaha kaleba!
- Waxaanu nahay Dad wax ku ool ah oo aan ku qanacsaneyn Kumeelgaar.ka adag.
- Dhalinteenu waa in ay Dhalinta Adduunka Nabad iyo Dhismo la tartami karaan.
- Dhibaatada Dhulkeena maahan midaan u riyaaqno!

**Goobta uu Dialogaasi ka Dhacaayo:!**

Kulturhaus Helferei **in Zürich**

**Cinwaanku waa:**

Kirchgasse 13, 8001 Zürich

Bahnhoka/La Gare

